



Gooryaan calooleed-warbixin ku saabsan oo ku socota guryaha Waaxda cudurada faafa- iyo nadaafadda jirka 2016

GOORYAAN CALOOLEED

Waa maxay gooryoon caloolodka looyaqaan Enterobius, sideese looga takhalusaa?



Enterobius waa gooryaan caadi ah. Oof kasta ayuuna ku dhici karaa. Wadamada ay nadaafada fiicani ka jirto waxaa gooryaankani ka yahay ama u keenaa infakshan gooryaan oo caadi ah. Gooryaanka Enterobius waxay badanaa caadi u yihiin oo galaan caruurta, marka dadka waaweyn loo eego.


Gooryaanka Enterobius waa 1 sentiimitir, cad-cadaan ciiro ah oo sisibibix ah, dun dhumucda le'eg ama u eg dun oo gooryaan yaryar ah. Waxaa lagu arkaa saxarada oogadeeda ama daloolka dabada agagaarkeeda.

Gooryaanka Enterobius dadkuu u gaar yahay; lagamana qaado xaarka xayawaanda rabaayadda ah ama barafka.

Waxaa laga qaadaa ugaxda gooryaanka laftigeeda oo inta gacanta raacdo qofka afka u gasha.


Calaamaddaha lagu gartaa waa daloolka dabada oo cuncun yeesha gaduutana. Inta badan ilmaha gooryaankani ku jiro si xasiloon uma seexdo oo wuxuu xoqaa daloolka dabada agagaarkeeda.

GOORYAANKA ENTEROBIUS WAREEG NOLOLEEDKIISA



DEEGAANKIISA

Gooryaankan ugaxdiisu waxay gashaa tusaale ahaan shukumaanada la isku tirtiro oo faraha la iska mariyo ama istaraashooyinka, go'yaasha furaashyada, alaabta caruurta ku ciyaarto, iyo xataa xayawaanada rabaayadda guryaha ku ah dhogortooda. Ugaxda gooryaankani waxay noolaan kartaa maalmo fara badan, iyo wali todobaadyo.




DALOOKKA DABADA


Cun-cunka aawadiis ilmuhu wuxuu xoqaa agagaarka daloolka dabada marka uu hurdo, markaas oo ugaxda gooryaanku ay ku daadato oo gaarto dharka, iyo waliba faraha, cidiyaha hoostooda, ka dibna si fudud afka ilmaha u gasho. Sidaas ayaa ugaxda (oo ah gooryaanka dhalan doonaa) nolosheeda ku sii wadataa oo wareegga nolosheedu yahay.

Gooryaanka Enterobius ugaxdiisu waxay gashaa afka waxayna u soo raacdaa faraha.

MINDHICIRADA



Mindhicirka ayaa ugaxdii waxay isu badashaa gooryaa qiyaastii bil gudaheed. Gooryaanka dhadig ee baaluqqa noqday wuxuu u dawaafaa ilmuhu markii uu hurdo maqaarka kore ee daloolka dabada, isagoo ku dhalaya oo ku dhajinaya ugxaan yaryar oo aan maykaraskoob maahee ishu qaban karin, ka dibna waxay tan dhadigi ku soo laabataa inta badan mindhicirkii. Gooryaankan cimrigiisu waa qiyaastii 1-3 bilood.



Is qaadsiintu waxay socon kartaa hal qof inuu mudo dheer sidaas isu qaadsiyo, haddii ugaxdu ay mar kale ka baxdo daloolka dabada oo agagaarkeeda afka ka gasho, iyadoo raacaysa cidiyaha iyo afka hore ee faraha.



QAABKA LOO DAAWEEYO

Daawo ayaa la qaataa

- Farmashiyaha waxaa laga helaa daawada gooryaanka ee loo yaqaan PYRVIN oo aan u baahnayn in dhakhtar kuu qoro, oo aad caadi uga iibsano karto farmashiyaha. Raac oo u qaado sida baakadda warqadda ku gudo jirta ku qoran.
- Qofka gooryaanku ku dhacay kaligiis daawada ma qaadanayo ee waa in dhammaan hal mar dadka qoyska ah ee guriga ku wada nooli ay daawada wada qaataan.
- Ugaxdu kuma dhimato daawada, oo wali ugaxda cudurkii waa laga qaadi karaa. Sidaas aawadeed waxaa aad muhiim u ah inaad raacdo booska 2 talo-bixinaha ku qoran, si markaas in aad mar labaad qaado aad uga hor tagto (fiiri sidoo kale sawirada muujinaya sida wareeg noleedka gooryaanka Enterobius yahay).
- Daawada inaad cusboonaysiiso oo mar kale qaadata waxaa loo baahdaa 1-2 todobaad ka dib. Markaas oo daawada la siiyo kaliya qofka markaa jiradii qaba oo gooryaanku hayo.

Daawada qaadashadeeda waxaa dheer oo muhiim ah ayna tahay lagama maarmaan in la sameeyo si looga hortago in mar kale la qaado gooryaankii arimahan soo socda

- Maadaama gooryaanka ugaxdiisi laga helayo wali agagaarka daloolka dabada, waa inaad si gaar ah uga taxadirta nadiifinta hoos oo aad hoosta isaka dhaqdo, gacmahana aad iska dhaqdo.
- Ku adkay caruurtaada muhimada faraxalashadu leedahay. Gacmaha waa in loo dhaqo si daxadar leh, ugu yaraan mar kasta oo aad suuliga ka soo baxdo, ka hor inta aadan cuntada cunnin iyo casariyaha af-geliskaa ka hor, "jibista" iwm. markii afka la gal-gashanayo.
- Cidiyaha iska jar oo mar kasta gaabi, nadiifina.
- Marka aad daawada kiniiniga ah qaadanayso oo daaweyntu kuu socoto iska badal dharka hoose sida kastuumada, dharka hurdada, shukumaanada ama tuweelada, harqadaha barkimooyinka iyo go'yaasha sariiraha. Si tartiib ah isla markaba toos qasaaladda ugu gur, iskana ilaali inaad bilaa dan ama sabab la'aan dharka jafto oo rux-ruxdo.
- Kastuumada waxaa khasab ah in aad mudo todobaad ah maalintii laba jeer iska badasho.
- Si gaar ah waxaa loo baahan yahay in loo nadiifiyo qolka jiiifka ama hurdada si sal iyo baar ah. Huufaray oo dabayli furaashyada, go'yaasha la huwado iyo barkimooyinka. Huufaray oo dhaq dhulka iyo meelaha kale ee oogoooyinka ah. Nadiifi meelaha taabashadu ku badan tahay sida gacanta albaabada laga furo iyo badhanka nalalka laga shido ama laga daaro.
- Markaa nadaafada wado, ha ilaawin inaad sidoo kale nadiifiso suuliyada, gaar ahaan musqusha qasabadaheeda, suuliga fadhiga botonka biyaha laga sii daayo iyo wareega fadhiga musqusha, halka nalka laga damiyo iyo albaabka gacanta laga furo.
- Nadiifi miiska ilmaha xafaayada ama dhaybarka looga badalo ka dib mar kasta oo aad isticmaasho. Xafaayadaha wasakhda ah toos markaba tanaga qashinka ugu rid.
- Nadiifi alaabta caruurta ku ciyaarto.
- Xanaanada caruurta iyo iskoolka waxaa caruuta u diri kartaa marka todobaadka hore ee daweyntu uu dhammaado ka bacdi.

Xaalad dhibaato ah markay kula soo gudboonaato waxaa la xiriirtaa waaxda cudurada faafa

••• kalkaalisada caafimaadka taleefankeedu waa: 8392 3120 isniinta, arbacada iyo jimcaha saacaddaha 9-11.